

Bayoolajiga noolaha yar ee dhakhtareed

2019-02-01

Somaliska

Patientanvisning för bakterieodling,
feces

Tilmaanta bukaan socodka ee beerida bakteeriyada, saxarada

Ka hor qaadida baaritaankan waxa loo baahanyahay

- Warqada soo gudbinta dhakhtar
- Xirmada, wadata tuumbada iyo qoriga
- Qafiska lagu soo qaadayo
- Haddii baaritaankan lagu soo dirayo boosta waxa loo baahanyahay: Galka waraaqaha ee alaabta jabida ka ilaalisa oo wata cinwaanka iyo farankaboollo



Xirmada
Qori iyo tuumbo

Qafiska lagu
soo qaadayo

Qaadida baaritaanka

U fiirso, xilliga qaadida baaritaano lagu cel-celinayo waa in shay baaryadan la qaado maalmo kala duwan.

1. Tuumbada baaritaanka iyo qafiska lagu soo qaadayo labadabu waa inay ku calaamadsanaadaan warqad magacu ku qoranyahay ama warqada lambarka leh ee la socota warqada soo gudbinta ee dhakhtar, taas baddelkeeda waa ku qor magacaaga iyo tobankaaga lambar.
2. Furka basaliga ah wareejin kaga saar tuumbada baaritaanka.
3. Qaad baaritaankan si dhakhso ah ka dib xilliga saxarada weliba ka hor warqad iskaga tirida iyadoo qoriga caaradiisa la marinayo futada. Hubso in saxaro saarantahay qorigan, tiro yar oo saxaro ah oo saaran caarada qorigan ayaa ku filan. Qoriga geli tuumbadan, qoriga ku jebi dacalka tuumbadan oo wareejis ku xir furkan.
4. Tuumbadan geli qafiska lagu soo qaadayo. Baaritaankan ku kaydi qabow (+2 ilaa +8 darajo) inta lala sugayo safar ku soo qaadida.
5. Warqada soo gudbinta dhakhtarka ku buuxi taariikhda la qaaday baaritaankan.
6. Soo gudbi baaritaankan sida ugu dhakhsaha badan, weliba isla maalintaas, keen shaybaarka daryeelka ee ugu dhow.
7. Haddii baaritaankan lagu soo dirayo boosta. Baaritaanka iyo warqada soo gudbinta ee dhakhtarka geli galka lagu rido alaabta jajabi karta oo keen sanduuqa boosta ama xafiiska boosta ee kuugu dhow. Iska ilaali jimcayaasha iyo maalinta ka horeysa maalin fasax weyn ah maadaama qaybinta boostu aanay dhicin maalinta ku soo xigta.